

Minneapolis waxay dejisay sharchiyo khuseeya cuntada iyo cabitaanka la iibinayo.

- Meheradaha cuntada ee shatiga ka hela  
Minneapolis waxaa khasab ku ah in ay raacaan  
sharchiyada deegaanka ama Green to Go
- Cuntooyinka xafladaha, isbitaallada,  
iyo guryaha dadka waaweyn lagama  
rabo sharciyada Green To Go

Sharciyada Green To Go waxa ay khuseeyaan waa cuntada iyo cabitaanka isla  
markiiba la cuno ama gacanta lagu sii qaato. Cuntooyinka iyo cabitaanka noocas ah  
waa in dadka lagu siiyo weelal ah:

- Kuwa dib loo isticmaali karo   • Kuwa dib loo warshadeyn karo   • Kuwa ciidda ku dhex milmaya

### **Caagag dib loo warshadeyn karo**

Caag kasta oo dib loo warshadeyn karo waa in  
ay ka muuqato fallaaro ah goobaabin 1, 2 ama 5.



### **Bacda madow**

Bacda madow waa qashin.

- Jooji in aad wax ku gurato bacda madow  
ee qashinka
- Goobaha degaanka ee qashinka dib u  
warshadeeyaa ma qabtaan bacaha  
madmadoow



### **Caagagga ciidda ku dhex milma**

Caagagga ciidda ku milma waxaa ku  
calaaamadsan shaabbad ah BPI.



### **Waxaa mamnuuc ah**

- Caagga lambar 6 (isticmaalka halka mar)
- Styrofoam™ (koob cad oo hal mar la  
isticmaalo)



[minneapolismn.gov/green-to-go](http://minneapolismn.gov/green-to-go)

For reasonable accommodations or alternative formats please contact an Environmental Health supervisor at 612-673-2301 or [Health@Minneapolismn.gov](mailto:Health@Minneapolismn.gov). People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000. TTY users call 612-263-6850. Para asistencia, llame al 612-673-2700 - Rau kev pab 612-673-2800 - Hadii aad Caawimaad u baahantahay 612-673-3500.

## Cuntada la daadinayo

Makhaayad kasta waa in ay diyaariso meelo kala duwan oo lagu daadiyo cuntada hanbada ah.


- Waxyaabaha dib loo warshadeyn Rkaro waa in dib loo warshadeeyaa
- Bacaha dib loo warshadeeyo waa in lagu so ururiyaa waxyaabaha orgaanigga ah loona adeegsadaa bacrinta



## Alaabta qaarkood

Alaabta hoose shaqo kuma laha sharciga Green To Go:

- Macalgad iyo fargeeto caag ah
- Caagga dhuuban ee wax lagu cabbo
- Caagga yar ee wax lagu walaaqo



## Talooyinka alaabta

- Weydii dadku in ay rabaan alaabta, kuwa caagga ah ee yaryar. Waxaad dadka siisaa markay rabaan oo keliya.
- Waxaa magaalada ka yaraanaya kharshka gubista qashinka

## Cuntada baakadeysan ee la iibinayo

Cuntada iyo cabitaanka weelal lagu qaadanayo waa in loo raaco sharciyada Green To Go.

Waxaa sharciga ka baxsan:

- Cuntooyinka warshadeysan, ee u diyaarsan in la sii iibiyo
- Balaatiig kasta oo dhumucdiisu ka weyn tahay dun

## Ka digtoonow

Waxyaabaha qaar ayaa sharci ahaan loogu oggol yahay in ay u fiican yihiin deegaanka ama bey'adda ama Green To Go.

## Degmada Hennepin

Degmada Hennepin waxay meheraduhu hawshan uga heli karaan deeq lacageed, calaamadeyn, iyo caawimaad ah mid farsamo. Booqo hennepin.us/business recycling, kala soo xiriir [businessrecycling@hennepin.us](mailto:businessrecycling@hennepin.us) oama 612-543-9298.

